# REPUBLIC OF SOMALILAND

# QABYO QORAALKA

# XEERKA KAHORTAGA IYO XAKAMAYNTA KAGANACSIGA IYO TAHRIIBINTA DADKA

## XEER LR. XX/2019

## ARAAR

## Golaha Wasiirada Jamhuuriyadda Soomaaliland:

| | |
|---|---|
| **Markay Arkeen:** | In faldambiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadku ay xadgudub culus ku yihiin xuquuqaha ku cad Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliland iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha. |
| **Markay Arkeen:** | In Xeerka Ciqaabta Guud iyo xeerarka kale ee khuseeya aanay ku filnayn la dagaalanka ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta muhaajiriinta, sidaa daraadeedna ay lagama maarmaan tahay in sida ugu haboon dembi looga dhigo ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka, loona dejiyo ciqaabta ku haboon, isla markaana mudnaanta la siiyo baadhista iyo dacwad-oogida, si wax looga qabto dadka ku kaca falalka tahriibinta iyo ka ganacsada dadka, loona horkeeno caddaalada. |
| **Markay Yaqiinsadeen:** | In talaabooyinka wax lagaga qabanayo falalka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadku ay u baahan yihiin iskaashi iyo wadashaqayn heer qaran ah oo dhex mara hay'adaha dawladda iyo qaybaha kala duwan ee bulshada. |
| **Markay Arkeen:** | In ay muhiim tahay in ilaalin haboon, taageero, ilaalin gaar ah, daryeel iyo kaalmo la siiyo dhibaneyaasha iyo dadka nugul iyada oo la tixgalinayo da'dooda, jinsiga ay yihiin iyo baahida gaarka ah ee ay qabaan. |

**SIDAA DARAADEED,** Golaha Wasiirada JSL Kalfadhigiisii 48-aad waxay ku ansixiyeen "Qabyo Qoraalka "Xeerka Kahortagga iyo La Dagaalanka Ka ganacsiga iyo Tahriibinta Dadka, Xeer Lr. XX/2019.

## Tusmo Bog

QAYBTA 1AAD: QODOBO GUUD ..... 6
Qodobka 1aad ..... 6
Magaca Xeerka ..... 6
Qodobka 2aad ..... Error! Bookmark not defined.
Eray-bixin ..... Error! Bookmark not defined.
Qodobka 3aad ..... 6
Ujeeddooyinka Xeerka ..... 8
Qodobka 4aad ..... 8
Xadka dabaqaadda Xeerka ..... 8
Qodobka 5aad: ..... 8
Dabaqaada ka baxsan xadka-dhuleed ee Somaliland ..... 8
QAYBTA 2AAD ..... 9
DANBIYADA KAGANACSIGA IYO TAHRIIBINTA DADKA ..... 9
Qodobka 6aad ..... 9
(A) Danbiyada Ka Ganacsiga Dadka ..... 9
Qodobka 7aad ..... 9
Gacan-siinta ama Gargaarida ka Ganacsiga Dadka ..... 9
Qodobka 8aad ..... 10
Xaaladdaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta ..... 10
Qodobka 9aad ..... 10
(B) Danbiyada Tahriibinta Dadka ..... 10
Qodobka 10aad ..... 10
Xaaladdaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta ..... 10
Qodobka 11aad ..... 11
Caawinta iyo Gacan-siinta Tahriibinta Dadka ..... 11
QAYBTA 3AAD ..... 11
Qodobka 12aad ..... 11
Danbiyada Waddaha Gaadiidka Tahriibeyaasha ..... 11
Qodobka 13aad ..... 12
Danbiyada La Xidhiidha Baasaaboorada iyo Aqoonsiyada ..... 12

Qodobka 14aad ... 12
Adeegyada Maaliyadeed ee La-xidhiidha Fal-danbiyeedyada Xeerkan ... 12
Qodobka 15aad ... 12
Dhaawaca Dhibanaha ... 12
Qodobka 16aad ... 13
La wareegidda Hantida Fal-danbiyeedka ... 13
Qodobka 17aad ... 13
Burburinta iyo Ishortaaga Caddaymaha ... 13
Qodobka 18aad ... 13
Ka baaqsashada Sheegista Xogtaa ... 13
Qodobka 19aad ... 13
Danbiga ay Gasho Hay'ad Shakhsiyad Qaanuuni ah lihi ... 13
QAYBTA 3AAD ... 14
BAADHISTA ... 14
Qodobka 20aad ... 14
Awoodda Baadhista ... 14
Qodobka 21aad ... 14
Adeegsiga Xirfado Gaarka ah oo Baadhiseed ... 14
Qodobka 22aad ... 14
Xaaladaha Ka Reebidda Ama Dhimista Ciqaabta ... 14
Qodobka 23aad ... 15
Aqbalaadda Caddaymaha Qoraalka ah (Admissibility of documentary evidence) ... 15
Qodobka 24aad ... 15
Ogolaanshaha Dhibanaha ... 15
QAYBTA 4AAD ... 16
CAAWINTA IYO MAGDHAWGA DHIBANAHA LA SIIYO ... 16
Qodobka 25aad ... 16
Dambi La'aanta Dhibanaha ... 16
Qodobka 26aad ... 16
Magdhawga iyo Cawil-celinta ... 16
Qodobka 27aad ... 16

Taakuleynta Dhibaneyaasha .......... 16
Qodobka 28aad .......... 17
Dib-ucelinta Dhibaneyaasha Ajaanibka ah .......... 17
Qodobka 29aad .......... 17
Dib u soo Celinta Dhibannayaasha u dhashay Soomaaliland .......... 17
Qodobka 30aad .......... 18
Macluumaadka Dhibannayaasha .......... 18
Qodobka 31aad .......... 18
Ilaalinta Guud ee Dhibannayaasha iyo Markhaatiyada .......... 18
Qodobka 32aad .......... 19
Dhibannayaasha Iyo Markhaatiyada Carruurta Ah .......... 19
QAYBTA 5AAD .......... 19
QODOBO KALA DUWAN .......... 19
Qodobka 33aad .......... 19
Muddada Oogista Danbiyada Kaganacsiga iyo Tahriibinta Dadka .......... 19
Qodobka 34aad .......... 19
Tafsiir .......... 19
Qodobka 35aad .......... 19
Nasakhaad .......... 19
Qodobka 36aad .......... 20
Kaabis iyo Wax ka bedel .......... 20
Qodobka 37aad .......... 20
Dhaqangalka .......... 20

# QAYBTA 1AAD: QODOBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa "Xeerka Kahortagga iyo La Dagaalanka Ka ganacsiga iyo Tahriibinta Dadka, Xeer **Lr. XX/2019.**

## Qodobka 2aad
## Eray-bixin

Haddaan Xeerkan si kale loogu sheegin, ereyadan hoos ku qoran waxa loola jeedaa

(a) **"Ku tagrifal xaalad nuglaansho"** waxa loola jeedaa ka faa'iideysiga nuglaanshaha qof aaminsan in aanu haysan dariiq kale oo aan ahayn in uu fuliyo hawsha ama waxa laga dalbay, oo ay kamid tahay balse aan ku koobnayn ka faa'iideysiga nuglaanshaha ka dhasha in qof uu si sharci-darro ama isaga oo aan wadan baasaaboor dalka soo galay, ama qabo xanuun jidheed ama maskaxeed ama uu naafo yahay, ama uur leeyahay, ama uu yar tahay oo awooddiisa go'aan qaadashadu aanay taam ahayn.

(b) **"Tahriibinta dadka"** waxa loola jeedaa fal kasta dalka loo soo galiyo ama looga saaro ama looga gudbiyo xuduudaha dal si aan sharci ahayn.

(c) **"Ka ganacsiga dadka"** Waxa loogu jeedaa kushaqaysiga, ku khasbidda lacag madax furasho ah, adoonsiga, kaganacsiga jidhka (exploitation of the prostitution for others) iyo ka saarista xubnaha jidhka ee qofka.

(d) **"Ka ganacsade dad (magafe)"** waxa loola jeedaa qofka safriya qofkale si kasab ama khiyaamo ah si uu uga helo ama cid kale uga hesho faa'iido dhaqaale ama madax furasho.

(e) **"Tahriibe"** Waxa loola jeedaa qof kasta oo sifo aan sharci ahayn dalka kaga baxay ama ku soo galay iyada oo ujeeddadu tahay tahriib;

(f) **Qofka la tahriibiyay:** Waxa loola jeedaa qof kasta oo dhibane ah ama uu ku dhacay falka tahriibintu.

(g) **"Lacag madax furasho"** waxa loola jeedaa lacagta ama hantida kale ee si khasab looga qaado qodka laga ganacsaday ama ehelkiisa ama saaxiibadiisa.

(h) **"Ogolaansho"** waxa loola jeedaa in qofku uu rabitaankiisa heshiis ku galo ama wax ku aqbalo isagoo leh xorriyad, awood iyo sharciyad uu rabitaankaas ku sameeyo;

(i) **"Gaadiid"** Waxa loola jeedaa nooc kasta oo gaadiid ah sida baabuur, doon, markab, diyaarad ama nooc kasta oo gaadiid oo loo adeegsan karo daabulista tahriibeyaasha iyo dadka laga ganacsanayo.

(j) **"Carruur"** waxa loola jeedaa qofkasta oo aan qaangaadhin ama ay da'diisu ay ka yar tahay 15 jir;

(k) **"Khasbid [baqo-gelin]"** waxa loola jeedaa u adeegsiga tahdiid [cabsi-gelin) ama u adeegsiga awooddeed (awood-sheegasho) si qofkaasi ama qof kale loogu dhaliyo in uu si ka baxsan ikhtiyaarkiisa u qabto shaqo ama adeeg ama aanu ku dhaqaaqin fal;

(l) **"Khiyaamo"**waxa loola jeedaa:

i. In la abuuro ama la ayido faham been ah, oo uu kamid yahay midka la xidhiidha sharciga, qiyamka ama xaaladda maskaxeed; ama
ii. In laga hortaggo in qofka kale uu helo ogaal wax ka badeli kara maxsuulka dhacdo taagan; ama
iii. In qof uu ku guuldareysto in uu saxo faham been ah oo uu hore u abuuray ama ayiday.

(m) **"Ka ganacsi galmo qof kale"**waxa loola jeedaa ka helida faa'iiddo maaliyaddeed ama kale ka shaqaynta galmada macaashka ah ee qofka kale, galmo ugu adeegasho/shaqeysi ama noocyada kale ee adeegyada galmo, oo ay kamid yihiin falalka muuqaalada galmada ama soo saarista waxyaabo muuqaalo galmo ah;

(n) **"Baasaaboor ama Aqoonsi been abuurka ah"** Waxa loola jeedaa: Baasaaboor ama aqoonsi ay samaysay cidkasta oo aan ahayn qofkii ama hay'addii awooda sharci u lahayn; ama lagu helay hab khayaamo, musuqmaasuq, ama sifo kasta oo kale oo sharci-darro ah; ama uu adeegsaday qof aan ahayn qofkii sida saxda ah u lahaa;

(o) **"Gelid Sharci-darro ah"** waxa loola jeedaa ka soo gudbida xuduuddaha iyadoo aan loo hoggaansamin shuruuddaha lagama maarmaanka u ah in si sharci ah loo soo galo Soomaaliland;

(p) **"Koox danbiileyaal abaabulan"** Waxa loola jeedaa koox qaab-dhismeed leh oo ka kooban laba qof iyo wax ka badan una hawlgashaqaab habaysan ama isku xidhan ujeeddadeeduna tahay in ay ku kacdo fal-dembiyeedyada xeerkan ku cad, si ay faa'iiddo maaliyaddeed iyo mid maadi ah ba si toos ah ama dadban ugu hesho;

(q) **"Dhaqannada lamid ah adoonsiga"** waxa loola jeedaa ka faa'iiddeysiga dhaqaale ee qof kale laga faa'iiddeysto, kunasaleysan xidhiidh dhab ah oo ku tiirsnaansho ama khasab (cabsi-gelin) ah, oo ay la socdaan in qofka si aad u ba'an looga qaado xuquuqaha madani ee aasaasiga ah, waxaana kamid ah culeys deyneed, midiidin, guurka khasabka ama adoonsiga ah, iyo ka faa'iiddeysiga caruurta iyo dhalaanka;

(r) **"Hantida dembiga laga dheefo"** waxa loola jeeda hanti kasta oo si toos ah ama dadban looga helay gelitaanka fal-dembiyeed Xeerkan ku cad;

(s) **"Adoonsi"** Waxa loola jeedaa habdhaqan guracan sida kushaqaysi, midiidin, kafaaiidaysi ku wajahan qof aan awood u lahayn in uu is-difaaco ama diido waxa laga dalabanayo xaaladdaha dhaqaale, bulsho iyo sharci ee uu ku sugan yahay awgeed;

(t) **Dalka qaabilay:** Waxa loola jeedaa dalka qofka laga ganacsanayo ama la tahriibinayo lageeyay;

(u) **Waddanka la dhex marayo"** Waxa loola jeedaa waddanka qofka la tahriibinayo ama laga ganacsanayo la keeno ama uu ku safrayo dhulka, badda ama cirka ama uu si aan joogto ahayn u joogo isaga oo qayb ka ah falka ka ganacsiga dadka ama tahriibinta;

## Qodobka 3aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkan waxa ka mid ah;

1) Ka hortaggida iyo la dagaalanka fal-danbiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
2) Xaqiijinta in si caddaalad ah oo hufan loo baadho isla markaana dacwad loogu oogo dadka ku kaca fal-dambiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
3) Ilaalinta iyo gargaarrida dhibbanayaasha laga ganacsaday iyo muhaajiriinta la tahriibiyo, iyadoo la ilaalinayo in si buuxda loo ixtiraamo xuquuqahooda aadamaha; iyo
4) Kobcinta iyo fududeynta iskaashiga maxaliga ah iyo Kan caalamiga ah ee la dagaalanka faldambiyeedyada ku xusan xeerkan.

## Qodobka 4aad
## Xadka dabaqaadda Xeerka

1) Xeerkan waxa lagu dabaqayaa baadhista, oogista iyo maxkamadaynta fal-danbiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka iyo falalka la xidhiidha ee ka dhaca dhammaaan Xuduudaha Dalka Jamhuuriyadda Somaliland ka kooban yahay.
2) Qodobada Xeerkan waxa kale oo lagu dabaqayaa fal-danbiyeedyada ku xusan firqada 1aaad ee qodobkan;
    a) Haddii uu ka dhacay dal kale balse uu ka bilaabmay dhulka Somaliland;
    b) Haddii uu ka dhacay dal kale balse eedaysanayeeshu soo galeen gudaha Somaliland; ama ka gudbiyeen dad xudduudaha dhulka Somaliland;

## Qodobka 5aad:
## Dabaqaada ka baxsan xadka-dhuleed ee Somaliland

1) Iyadoo aan la xaddidayn qodobada 7aad iyo 8aadee Xeerka Ciqaabta Guud, Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa fal-dembiyeed kasta oo ku xusan Xeerkan oo lagu galay meel ka baxsan xadka-dhuleed ee Soomaaliland marka uu:

    a) Qofka Fal-dembiyeedka geystay uu yahay muwaadin Soomaaliland u dhashay;
    b) Qofka fal-dembiyeedka loo geystay yahay muwaadin Soomaaliland u dhashay.
    c) Qofka Fal-dembiyeedka ku kacay yahay qof haystay degennaansho in uu ku nolaado Soomaaliland gudaheeda wakhtiga uu fal-dembiyeedka ku kacay.

# QAYBTA 2AAD
# DANBIYADA KAGANACSIGA IYO TAHRIIBINTA DADKA

## Qodobka 6aad

## (A) Danbiyada Ka Ganacsiga Dadka

1) Qof kasta oo abaabula, safriya, daabula, guri ugu haya qof kale isagoo adeegsanaya qaab cabsi-galin ama tahdiid ama hanjabaad ah; ama xoog u adeegsada; ama qaabab kale oo baqo-gelin (khasab) ah; ama qofaalasho, ama dagid, ama khiyaamo ah; ama ku tagrifal awoodeed, ama ka faaiidaysta xaaladda nugayl ee qofka; ama ku bixiya ama ku qaata lacag ama faa'iiddo kale; isagoo ujeedadiisu tahay dhiig-miirasho iyo ku macaashida qofka (ku ganacsi): kuwaasi oo ay ka mid yihiin ku ganacsiga jidhka qofka (exploitation of the prostitutuion of others), ku shaqaysi khasab ah; (forced labour) adoonsi (slavery); ama falalka la midka ah ama kala bixidda xubo jidhkiisa ka mid ah (removal of organs); ama lacag madax furasho ah ku qasba inuu bixiyo waxa uu galay fal-danbiyeed ka ganacsi dad.
2) Abaabulka, safrinta, daabulista ama guri ugu haynta loo gaysto qof caruur ah ama aan lahayn awooda garashada ama rabidda, ee loola jeedo dhiig-miirasho iyo kushaqaysi, waxa loo qaadanayaa in ay tahay fal-dambiyeed ka ganacsi dad, xataa haddii aan loo adeegsan qaababka xooga ama cabsi gelinta ah ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.
3) Qof kasta oo lagu helo danbiyada ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 10 ilaa 20 sano oo xadhig ah.
4) Ogolaanshaha dhibaneyaasha fal-danbiyeedyada ku xusan faqrada 1aad mayeelanayaan saamayn sharci oo cudurdaar u noqda eedaysanaha.

## Qodobka 7aad

## Gacan-siinta ama Gargaarida ka Ganacsiga Dadka

Qof kasta oo gacan ka gaysta fal-danbiyeedka ka gancsiga dadka isaga oo og ama ay hayd in uu ogaado;

1) u ogolaada gurigiisa in lagu hayo ama loo isticmaalo ka ganacsiga dadka ama;
2) u diyaariya gaadiid, ama jidmariya ama u fududeeya daabulida dadka dhibanaha ah ee dhinaca dhulka, badda, ama cirka; ama
3) daabaca, xayaysiiya, faafiya; ama si kale u dhiirigaliya ka ganacsiga dadka isaga oo adeegsanaya Af ahaan, qoraalo daabacan ama aaladda internetka ama hab kale oo isgaadhsiinta elektarooniga ah, ama
4) maamula, fura; ama maalgaliya xarun u taagan ujeeddooyinka ka ganacsiga dadka; ama

5) ka caawiya ama usoo saara ama u sameeeya aqoonsi ama waraaqaha socdaalka oo been abuura ama ka caawiya helitaanka waraaqahasi si sharci darro ah si qof kale faaiido uga helo.

Waxa uu galay faldanbiyeed, waxana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 5 ilaa 10 sano oo xadhig ah.

## Qodobka 8aad
## Xaaladdaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta

1) Maxkamaddu waxay awood u leedahay in ay korddhiso ciqaabta ku xusan qodobka 6aad iyo 7aad ee Xeerkan saddex meelood meel ahaan:
    a) Haddii fal-dambiyeedka loo adeegsaday xoog; maandooriye ama hub;
    b) Haddii dhibanaha fal-dembiyeedku yahay qof carruur ah, ama qof haween ah; ama qof nugul;
    c) Haddii fal-dembiyeedka ay ka dhashaan dhaawac ku keena dhibanaha waxyeelo maskaxeed ama jidheed;
    d) Haddii fal-dembiyeedka ay fuliyeen koox dembilayaal abaabulan ah;
    e) Haddii fal-dembiyeedku ku dhacay in ka badan hal dhibane;
    f) Haddii qofka falka geystay uu hore ugu dhacay xukun ciqaab oo isla fal-dembiyeedkan ama mid lamid ah;
    g) Haddii fal-dembiyeedka uu ku kacay sarkaal ama shaqaale dawladeed oo ku tagrifalay awoodiisa; ama
    h) Haddii qofka falka ku kacay uu dhibanaha ku lahaa meeqaam mas'uuliyadeed ama aaminaadeed;

## Qodobka 9aad
## (B) Danbiyada Tahriibinta Dadka

1) Qof kasta oo si kula kac ah, si uu u helo ama cid kale u hesho si toos ah ama dadban faa'iido maaliyeed ama mid kale oo maadi ah, u soo galiya; ama ka saara; ama ka gudbiya; ama isku daya in uu soo galiyo; ama ka saaro; ama ka gudbiyo xudduudaha Somaliland si xadgudub ku ah xeerka socdaalka, waxa uu galay fal-danbiyeed.
2) Qof kasta oo lagu helo danbiga ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 5 ilaa 10 sano oo xadhig ah.

## Qodobka 10aad
## Xaaladdaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta

1) Maxkamaddu waxay awood u leedahay in ay kordhiso ciqaabta ku xusan qodobka 9aad ee Xeerkan saddex meelood meel ahaan:

a) Haddii qofka dembiga ku kacay uu ku lug leeyahay fal ujeeddadiisu tahay bixinta, qaybinta, soo saarida, iibinta, siinta ama haysashada dhukumenti aqoonsi ama socdaal oo been abuur ah;
b) Fal-dembiyeedku uu khuseeyo xaaladdo khatar geliyey ama ay geli karaysay nolosha ama ammaanka qofka la tahriibinayey;
c) Haddii Fal-dembiyeedka loo galay si naxariis la'aan ah; ama bahdilaad ah; ama loo dhaqmay qaab bini-aadamnimada ka baxsan, oo ay ku jirto ka faa'iiddeysiga dadka la tahriibiyey;
d) Haddii qofka la tahriibinayay yahay ilmo carruur ama gabadh uur leh; ama qof nugul;
e) Haddii Qofka dembiga ku kacay uu ka faa'iiddeystay nuglaanshaha qofka;
f) Haddii qofka danbiga ku kacay uu hore u galay isla fal-dembiyeedkan.
g) Haddii qofka Fal-dembiyeedka galay uu qayb ka ahaa hawl ay fulinaysay koox dembiileyaal abaabulan ah;
h) haddii qofka dembiga galay u adeegsaday daroogo, daawo ama hub;
i) Haddii Fal-dembiyeedku la xidhiidho tiro aad u badan oo tahriibeyaal ah ama haddii danbiga si baahsan loo sameeyay;
j) Qofka dembiga ku kacay uu wakhtigaas ahaa sarkaal dawladdeed;
k) Haddii danbiga ay la socdeen xaaladdo khatar galiyay ama ay suurtagal ahayd in ay khatar galiyaan nolosha ama badbaadada qofka la tahriibinayay;

## Qodobka 11aad

## Caawinta iyo Gacan-siinta Tahriibinta Dadka

1) Qof kasta oo og ama ay hayd in uu ogaado; si uu faa'iido dhaqaale ama faa'iido kale oo toos ah ama dadban uga helo, gacan ka gaysta; ama u fududeeya, ama caawiya; ama haga; ama jid mariya tahriibayaal si loo soo galiyo dhulka Somaliland ama looga gudbiyo xuduudaha dalka Somaliland; iyada oo ujeeddadu tahay fudaydinta falka tahriibinta dadka, waxana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya shan 2 ilaa 5 sano oo xadhig ah.

# QAYBTA 3AAD

# DANBIYADA LAXIDHIIDHA KAGANACSIGA IYO TAHRIIBINTA DADKA

## Qodobka 12aad

## Danbiyada Waddaha Gaadiidka Tahriibeyaasha

1) Qof kasta oo, si uu uga helo faaiidooyin dhaqaale ama faaiidooyin kale oo toos ah ama dadban, ugu qaada gaadiid tahriibeyaal waxa uu galay danbi waxana lagu ciqaabayaa marka danbiga lagu helo xabsi u dhaxeeya 5 ilaa 10 sanno oo xdhig ah.

## Qodobka 13aad
## Danbiyada La Xidhiidha Baasaaboorada iyo Aqoonsiyada

1) Qof kasta oo si ula kac ah uga been sheega xog si uu u fududeeyo qaadashada aqoonsi ama baasaaboor; ama si khiyaamo ah uga qaata laamaha dawladda ee ku shaqada leh, isagoo ujeedadiisu tahay in uu ku fududeyo ama lagu sameeyo faldambiyeedyada ka ganacsiga iyo tahtiibinta dadka; waxa uu galay danbi, waxana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 3 ilaa 5 sanno oo xadhig ah.
2) Qof kasta oo si ula kac ah, si uu uga helo faa'iido dhaqaale ama faa'iidooyin kale oo toos ah ama dadban, u sameeya; ama u been-abuura; ama usoo saara; ama u bixiya; ama u iibiya, ama kala shaqeeya cid kale; in ay si been-abuur ah u sameeyaan baasaaboor ama aqoonsi; ama ka been sheega xogta qof kale si uu u fududeeyo qaadashada baasaaboor ama aqoonsi; iyadoo ujeedadiisu tahay in loo adeegsado galista fal-dembiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka ee ku xusan qodobada 6aad iyo 9aad ee xeerkan, waxa uu galay danbi waxana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 5 ilaa 10.
3) ciqaabta waxa lala akhrinayayaa Qodobka 37-aad ee xeerka socdaalka Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 72/1995 iyo qodobada ciqaabta ah ee xeerka ciqaabta guud

## Qodobka 14aad
## Adeegyada Maaliyadeed ee La-xidhiidha Fal-danbiyeedyada Xeerkan

1) Qof kasta, ama shaqaale kasta oo xawaaladeed, oo si toos ah ama si dadban u bixiya adeegyo maaliyadeed ama xawila lacag;
    a) Isaga oo og ama haya sababo macquul ah oo lagu rumaysan karo in loo adeegsanayo gabi ahaan ama qayb ahaan fal ujeedadiisu tahay in loo xawilo tahriibiyayaasha si madaxfurasho ama loogu fududaynayo qof kasta oo ku kacay ama ku kacay faldambiyeedka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka, ama
    b) Isaga oo og haya sababo macquul ah oo lagu ogaan karo in adeegaasi loo isticmaalayo ama loogu faa'iidaynayo qof si uun ugu lug leh arrimaha kaganacsiga iyo tahriibinta dadka.

   Waxa uu galay danbi waxana marka danbiga lagu helo lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 5 ilaa 10 sanno.

## Qodobka 15aad
## Dhaawaca Dhibanaha

Haddii faldambiyeedka ka garacsiga iyo tahriibinta dadka ee ku xusan xeerkan, uu ku keeno dhibanaha dhawaac halis ah ama dhimasho, eedaysanayaha lagu helay dambigasi waxa lagu xukumayaa xabsi daa'im ama dil kolba sida uu dambigaasi yahay.

## Qodobka 16aad
## La wareegidda Hantida Fal-danbiyeedka

1) Marka laga yimaad ciqaab kasta oo lagu sheegay xeerkan iyo xeer kale gudahiisa, Maxkamaddu waxa ay awood u leedahay in ay amarto in lala wareego dhammaan hantida iyo faa'iidooyinka laga dheefo fal-danbiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
2) Iyada oon waxba loo dhimmayn nuxurka faqrada 1aad ee qodobkan, Maxkamaddu waxa kale oo ay amri kartaa in lala wareego wixii hanti ah ee loo adeegsaday fududaynta danbiyada xeerkan ku xusan.
3) Faa'iidooyinka iyo hantida loola wareegay si waafaqsan faqrooyinka qodobkan, waxa lagu bixinayaa magdhawga dhibanaha, haddii ay ku filnana weydana hantida gaarka ah ee eedaysanaha ayaa laga bixinayaa marka uu danbigu ku caddaado.
4) Haddii faa'iidooyinka laga dheefay ama lagu galay danbiga la burburiyo, la qiimo tiro; ama si kale qofka danbiga ku kacay uga dhigo wax aan qiimo lahayn; ama la qariyo; ama cid kale lagu wareejiyo si looga hortago in la helo ama lagala baxsado la-wareegista, qofka danbiilaha ah waxa lagu xukumayaa in uu bixiyo xaddi lacageed u dhigma qiimaha hantida iyo faa'iidooyinka uu ka helay danbiga.

## Qodobka 17aad
## Burburinta iyo Ishortaaga Caddaymaha

Qof kasta oo burburiya ama qariya caddaymo ama laaluusha ama u hanjaba qof kale si uu u burburiyo ama u qariyo caddaymo la xidhiidha fal-danbiyeedyada ku xusan xeerkan, waxa uu galay danbi waxana lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 ilaa 5 sannadood.

## Qodobka 18aad
## Ka baaqsashada Sheegista Xogtaa

Qof kasta oo hela xog ama caddayn ku saabsan fal-danbiyeedyada ku xusan xeerkan oo ka baaqsada ama ku guuldaraysta in uu si dhakhso ah ugu soo wargaliyo Booliska ama hay'adda kale ee awoodda u leh, iyada oo aanay jirin sabab macquul ah oo u diidaysa in uu sidaa sameeyo, waxa uu galay danbi waxana lagu ciqaabayaa 6 bilood ila 2 sanno oo xadhig ah.

## Qodobka 19aad
## Danbiga ay Gasho Hay'ad Shakhsiyad Qaanuuni ah lihi

Marka danbi ka soo horjeeda qodobada xeerkan ay gasho hay'ad shakhsiyad qaanuuni ah leh qof kasta oo markaa danbiga ay gashay ka ahaa Agaasime, Maareeye ama Sarkaal la mid ah amaba loo wakiishay in uu ku sime ahaan xilkaas u qabto ama si uun masuul

uga ahaa maamulka arrimaha hay'adda shaqsiyada qaanuuniga ah leh, ama ka caawinayay maamulkaaas, danbigaas isaga ayaa musuul ka ah, haddii aanu soo caddayn in danbiga la sameeyay isaga oon ogayn, aan ogolaan ama aan taageersanayn iyo in uu sameeyay, dadaal kasta oo laga rabay si uu uga hortago samaynta danbiga, marka la eego dabeecadda shaqooyinkiisa ee xilkaas iyo dhammaan duruufaha kale.

## QAYBTA 3AAD
## BAADHISTA

### Qodobka 20aad
### Awoodda Baadhista

1) Habka baadhitaanka, eedaynta, xukumidda iyo hanaanka ururinta caddaynta danbiyada ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka iyo fal-dambiyeedyada kale ee la xidhiidha, waxa loo raacayaa si waafaqsan qodobada Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee khuseeya.
2) Dhamaan ciidamada amniga ee ay ka mid yihiin Ciidanka Booliska, Ciidanka Socdaalka iyo Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa ku waajiba ka hortagga, iyo qabashada faldambiyeedyada ku xusan xeerkan.

### Qodobka 21aad
### Adeegsiga Xirfado Gaarka ah oo Baadhiseed

1) Marka ay jiraan tuhuno macquul ah oo lagu rumaysto in fal-danbiyeedka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka la galayo, ama ay suurto gal tahay in la galo, sarkaalka baadhistu waxa uu awooddaa:
    a) In uu ku biiro cida la tuhunsan yahay, Urur ama Koox miday doonto ha noqotee;
    b) In uu daba galo sidoo kalana basaaso dadka la tuhunsan yahay;
    c) In uu amar maxkamadeed ku dhagaysto xidhiidhada/isgaadhsiinta gaarka ah ee dadka la tuhunsan yahay;
    d) In uu la sameeyo xidhiidh sharci oon dhab ahayn;
    e) In uu isaga oo xushmaynaya xuquuqda aadamaha adeegsado xeeladdo baadhiseed gaar ah oo haboon si uu u helo caddaymo caddaynaya faldambiyeedka.

### Qodobka 22aad
### Xaaladaha Ka Reebidda Ama Dhimista Ciqaabta

1) Qofkasta, oo ku lug yeesha dambiyada ka ganacsiga dadka ama tahriibin, ee ka hor inta aanu soo bixin go'aan kama dambeys ah, bixiya cadeyn muhiim ah oo la

xidhiidha dambiga dhacey ama sheega cidkale oo ku gashey dambiga, waxa laga dayn kara guud ahaan ama qayb ahaan ciqaabta, iyadoo laga soo saarayo go'aan Maxkamadeed.

2) Iyadoo oo aan waxba loo dhimmayn farqada (1) ee qodobkan, haddii uu dhibanuhu dhinto, ama uu soo gaadho dhaawac halis ah, ama uu ku keento xanuun aan dawo lahayn, eedaysanha laga saamixi maayo ciqaabta, balse iyada oo la qiimeynayo doorkiisa ka qayb qaadasho dambi iyo muhiimada cadeynta uu bixiyey waa laga dhimmi kara ciqaabta.
3) Si loo dabaqo Qodobkan "Caddayn muhiim" waxa loola jeedaa caddaynta:
   a) Ku filan in eedaysanaha danbi lagu helo iyada oon la helin caddaymo kale;
   b) Ay tahey cadeyn keensan karta in lagu soo qabto eedaysanayaal kale ama lagu helo cadeymo kale oo dheeraad ah;
   c) Xoojinaysa caddaymo kale, kuna filan in eedaysanaha danbiga lagu helo la'aanteedna aanay suurtagal ahayn in eedaysanaha danbiga lagu helo.

## Qodobka 23aad

## Aqbalaadda Caddaymaha Qoraalka ah (Admissibility of documentary evidence)

Marka sarkaaalka baadhaha ahi uu gacanta ku dhigo qoraalo ama caddaymo kale isagoo gudanaya awoodaha ku xusan xeerkan, qoraaladaasi ama caddaymahaasi ama caddayn kasta oo kale waxay noqonayaan kuwo loo aqbali karo caddayn ahaan dacwad kasta oo xeerkan ah, iyada oo aan loo eegayn xeerar kale oo ka soo horjeeda.

## Qodobka 24aad

## Ogolaanshaha Dhibanaha

1) Iyadoon la eegayn raali-ahaanshaha dhibanuhu ku ogolaaday fal-dambiyeedyada xeerkan ku xusan, haddii ogolaanshaha lagu helay hab khasab a;, ama hanjabaad ah; ama noocyo kale oo cabsi galin ah; ama afduub, khayaamo, ku tagrifal awoodeed; ama iyada oo laga faa'iidaysanayo nuglaanshaha qofka; ama ku bixinaya ama ku qaata laaluush; ama faa'iido kale, si loo helo ogolaanshaha dhibanaha ama qofka ka masuulka ah, ogolaanshahaasi ka baajin mayso qofkaasi masuuliyadda fal-dambiyeedka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka ee uu galay.
2) Haddii ilmo yar laga ganacsanayo ama loo soo tahriibinayo Somaliland ama laga tahriibinayo, ogolaanshaha uu bixiyo ilmaha yar ama qofka masuulka ka ahi lama aqbalayo.

# QAYBTA 4AAD
# CAAWINTA IYO MAGDHAWGA DHIBANAHA LA SIIYO

### Qodobka 25aad
### Dambi La'aanta Dhibanaha

3) Dhibane kasta oo uu ku dhacay danbiga kaganacsiga dadka ama tahriibintu loo raaci maayo wax dambi ah oo la xidhiidha in uu dhibane u noqday danbiyada ku xusan xeerkan.
4) Dhammaan marxaladdaha caddayn urrurinta, baadhista ama dacwadda fal-danbiyeedyada xeerkan ku xusan, waxa lagu dadaalayaa in la ogaado dhibaneyaasha iyo in la go'aamiyo cidda ay yihiin, waddamada ay u dhasheen iyo da'dooda si loo xaqiijiyo in laga soo kaxeeyay danbiileyaashii haystay.

### Qodobka 26aad
### Magdhawga iyo Cawil-celinta

1) Haddii qof lagu helo danbiyada xeerkan ku xusan, Maxkamaddu, waxay amri kartaa danbiilaha iyada oon laga dhaafin masuuliayddii ciqaabeed, in uu siiyo magdhaw ama cawil-celin dhibanaha, qaraabadiisa ama hay'adda kharash ku gashay magaca dhibanaha.
2) Xaddiga magdhawga lagu sheegay faqrada 1aad ee qodobkan waa in uu noqdo kharash daboolaya daawaynta maskaxeed iyo midda caafimaad ee dhibanaha, kharashka safarka, waxyeelada maskaxeed, ama kharashaadka kale ama khasaaraha tooska loo galay ee ka dhashay danbiga iyo kharashaadka kale ee haboon.

### Qodobka 27aad
### Taakuleynta Dhibaneyaasha

1) hay'addaha awoodda u leh ee Soomaaliland waxay dajinayaan qorsheyaal ku saabsan daryeelka dhibaneyaasha danbiyada xeerkan ku xusan, sida:
   a) In lagu soo celiyo dalka Somaliland ama laga kaxeeyo Somaliland oo dalalkoodii lagu celiyo;
   b) in la siiyo daryeelka iyo daaweynta caafimaad ee lagama maarmaanka ah, oo ay kamid tahay, haddii ay haboon tahay, baadhis ikhtiyaari ah oo bilaash ah oo si qarsoon oo xafidan looga baadhayo xanuunka HIV-ga iyo xanuunada kale ee galmada layskugu gudbiyo;
   c) in la siiyo Gargaarka la talin iyo nafsi ah oo lagu siiyo luuqad uu qofku fahmi karo, iyo si qarsoon oo xafidan oo la ixtiraamayo arrimaha u gaarka ah qofka ay khusayso;
   d) in la siiyo Macluumaadka la xidhiidha kaalmada sharci ee wakiil lagaga noqonayo dantiisa inta lagu jiro baadhista dembiga, oo ay kamid yihiin helitaanka magdhow, iyo haddii ay suurtogal tahay, in laga caawiyo

codsiga ee meeqaamka socdaalka caadiga ah; iyo

e) Wixii kale ee kaalmo/caawin ah ee ay dhibaneyaashu u baahdaan.

2) Marka ay dajinayaan qorsheyaasha ku xusan faqrada 1aad, hay'adaha awooda u lihi waxay tixgalinayaan da'da, jinsiga iyo baahiyaha gaarka ah ee caruurta iyo dadka laxaadka la' iyo duruufaha gaarka ah ee qof kasta oo dhibane ah si loo illaaliyo xuquuqahooda biniaadminimo loona dhawro sharafta aadanaha.
3) Iyada oon waxba loo dhimmayn qodobada xeerarka kale ee jira, dhibaneyaasha waxa loo ogolaanayaa in ay Somaliland sii joogaan inta dacwaddooda sharci la soo gebogebaynayo.
4) Sarkaal kasta oo dawladeed ama qof kale oo kasta oo u xilsaaran la hadalka qofka dhibanaha ah waa in uu kula hadlo dhibanaha luuqad uu fahmi karo.
5) Adeegyada caawinta ah ee lagu sheegay qodobkan waxa ay helayaan dhibaneyaashu iyaga oon loo eegin jinsiga ay yihiin, waddanka ay u dhasheen, qabiilka ay yihiin, diinta ay haystaan ama kooxda ama qabiilka ay taabacsan yihiin.

## Qodobka 28aad
## Dib-ucelinta Dhibaneyaasha Ajaanibka ah

1) Qof kasta oo ajaanib ah isla markaana ah dhibane faldanbiyeedyada ku xusan xeerkan lagu qaadi mayo danbi.
2) Iyada oon waxba loo dhimmayn qodobada xeerarka kale ee ku saabsan dal kugalka, baasaaboorada iyo xaaladdaha kale, marka dhibane dal kale u dhashay la aqoonsado isaga oo ku sugan Somaliland, Laanta Socdaalka oo kaashanaysa Hay'addaha ay khusayso iyo Hay'addaha Caalamiga ah, waxa ay dhibanaha ku celinaysaa waddankii uu u dhashay.
3) Marka muwaadin shisheeye loo aqoonsado in uu yahay marag muhiim ah ama haddii uu isagu doonayo in uu marag u furo, si waafaqsan xeerarka ay khusayso ayaa loo siinayaa degenaansho kumeelgaadh ah ilaa inta dacwadda maxkamadda laga gebogebaynayo, xuquuqdiisa biniaadminimana waa la xushmaynayaa.

## Qodobka 29aad
## Dib u soo Celinta Dhibannayaasha u dhashay Somaliland

1) Hay'addaha awoodda u leh waa in ay fududeeyaan isla markaana ogolaadaan soo noqoshada dhibanayaasha faldambiyeedyada xeerkan ee u dhashay Soomaaliland si aanu ku jirin dib u dhac aan macquul ahayn iyadoo la tixgelinayo xuquuqahiisa iyo ammaankiisa.

2) Haddii dhibanahu aanu haysan dhukumentiyadii loo baahnaa isla markaana ay hay'addaha awoodda u leh ee dalka qofka lagaga ganacsanayey codsadaan, hay'adda awoodda u leh waxay siinaysaa dhukumentiyadan loo baahan yahay ama

ogolaanshaha kale ee lagama maarmaanka u ah in qofkaasi uu awood u yeesho in uu dib usoo galo Soomaaliland.

## Qodobka 30aad
## Macluumaadka Dhibannayaasha

1) Dhammaan xogta shakhsiga ah ee la xidhiidha dhibannayaasha ka ganacsiga dadka waa in loo isticmaalaa si gaar u ah ujeeddooyinka markii hore loo soo urrursaday.
2) Hay'adda awoodda u leh waxay soo saaraysaa hab (protocol) laysku weydaarsado macluumaadka ka dhaxeeya hay'addaha ay khusayso aqoonsashada iyo gargaarka dhibanahu iyo baadhista dembiyada iyadoo si buuxda loo ixtiraamayo ilaalinta arrimaha shakhsiga ah iyo amniga dhibannayaasha.
3) Natiijooyinka baadhista caafimaad ee dhibannaha ka ganacsiga dadka waa in loogu dhaqmaa si qarsoon oo xafidan waxaana loo adeegsanayaa ujeeddada baadhista dembiga iyo dacwad oogida oo keliya.
4) Ku xadgudubta faqradda 3aad ee Qodobka waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan 10,000,000 Shillinka Soomaaliland.
5) Hay'adda awoodda u leh waa inay siisaa dhibannayaasha macluumaadka nooca daryeelka, gargaarka iyo ilaalinta ay xaqa u leeyihiin iyo suurtogalnimada daryeelka iyo gargaarka ay bixinayaan ururada aan dawliga ahayn iyo hay'addaha dhibannayaasha taakuleeya, iyo sidoo kale macluumaadka wixii dacwad ah ee la xidhiidha.
6) Macluumaadka waxaa lagu siinayaa luuqad uu dhibanahu fahmayo. Haddii dhibanahu aanu wax akhriyi karayn, waa in uu uga waramaa masuul awoodda u leh.
7) Dhibanayaasha waxa lala xidhiidhsiinayaa eheladooda iyo safaarahooda ugu dhaw , marka ay yihiin dal shisheeye

## Qodobka 31aad
## Ilaalinta Guud ee Dhibannayaasha iyo Markhaatiyada

1) Hay'addaha awoodda u leh waa in ay qaadaan dhammaan talaabooyinka lagu xaqiijinayo in dhibannayaasha iyo markhaatiyada, iyo qoysaskooda, la siiyey ilaalin ku filan haddii amnigoodu uu khatar ku jiro, oo ay kamid yihiin talaabooyinka lagaga ilaalinayo cadaadiska iyo aargoosiga.
2) Dhibannayaasha iyo markhaatiyada waa in ay helaan barnaamij iyo talaabo kasta oo jirta oo lagu ilaaliyo markhaatiyada.
3) Marka ay lagama maarmaan u tahay sugida ammaanka dhibanaha ama markhaatiga, hay'addaha awoodda u leh marka uu ka codsado dhibanahu ama iyagoo la tashanaya isaga/iyada waxay qaadi karaan dhammaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah aag badelka dhibannaha iyo xaddidaada sheegida magaciisa, cinwaankiisa iyo macluumaadka kale ee qofka lagu aqoonsan karo ilaa xad inta ay macquulka tahay

## Qodobka 32aad
## Dhibannayaasha Iyo Markhaatiyada Carruurta Ah

Marka laga yimaad dhammaan dammaanad qaadyada kale ee Xeerkani uu bixinayo:

a. Dhibannayaasha carruurta ah, gaar ahaan kuwa markaas uun dhashay, waa in taxadar iyo feejignaan gaar ah loo yeeshaa;
b. Marka aan la hubin da'da dhibannahu isla markaana ay jiraan sababo lagu aamini karo in dhibannahu uu carruur yahay, waxaa laga soo qaadayaa in uu carruur yahay waana in sidaas loola dhaqmaa, iyadoo ay soconayso xaqiijinta da'diisu;
c. Haddii dhibannahu yahay qof da'yar oo aan la wehelin hay'addaha awoodda u leh waxay:
   i. Magacaabayaan masuul sharci oo wakiil uga noqda ilmaha dannahiisa;
   ii. Qaadayaan dhammaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah ogaanshaha aqoonsigiisa iyo dhalashadiisa;
   iii. Deddaal ka samaynayaan in ay ogaadaan qoyskiisa markay tani ku jirto ilmaha dannahiisa ugu fiican;

# QAYBTA 5AAD
# QODOBO KALA DUWAN

## Qodobka 33aad
## Muddada Oogista Danbiyada Kaganacsiga iyo Tahriibinta Dadka

Danbiyada kaganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka ee lagu sheegay xeerkan waxa loo tixgalinayaa in ay yihiin danbiyo ka dhan ah xuquuqda aadanaha oogistooduna malaha mudddo dhaaf.

## Qodobka 34aad
## Tafsiir

Xeerkan waxa loo tafsiirayaa si waafaqsan mabaadida xeerarka caalamiga ah. Loo fasiri maayo xeerkan in uu bixinayo ilaalo ka yar midda ay bixiyeen xeerarka kale ee qaranka ama heshiisyada xuquuqda aadamaha ee caalamiga ah ee la xidhiidha fulinta xeerkan.

## Qodobka 35aad
## Nasakhaad

Waxa halkan lagu nasakhay xeer kasta, xeer-nidaamiye kasta, digreeto kasta iyo go'aan kasta oo maamul oo ka hadlaya kaganacsiga dadka iyo tahriibinta tahriibeyaasha oon la jaanqaadayn qodobada xeerkan.

## Qodobka 36aad
## Kaabis iyo Wax ka bedel

Kaabis iyo wax ka bedel ayaa lagu samayn karaa qodobada Xeerkan mar kasta oo loo baahdo iyada oo raacayo habraacayada caadiga ah ee loo maro kaabista iyo wax ka bedelka xeerarka dalka.

## Qodobka 37aad
## Dhaqangalka

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka baarlamaanku ansixiyo ee Madaxweynuhu saxeexo Faafinta Rasmiga ahna lagu soo saaro.